Wargeyska macaamiisha Light Reading, Seattle City Light

Ka socota maamulaha

Xilli kasta wuxuu waxaa ka hor yimaada wax ku sameeya taxadi. Qaboobaha, dabeesha cimilada waxay soo riddi kartaa khadadka quwadda. Mark la gaaro kuleylaha, waa kuleelka waxa culeyska saara qalabkena, khaas ahaan siistemka qalabka ku jira dhulka hoostiisa. Khadadka danabka ee ku jira dhulka hoostiisa waxaa loo sameeyay in ay u adkeystaan biyaha buuxin kara qalabka, hase ahatee bacdamaa hawada kululaato, biyaha gadaal ayay u noqdaan kaddibna khadadka quwadda ayaa daciif noqda. Inkastoo aan si joogto ah u fiirino una hagaajino khadadka, mar mar biyo ayaa soo gaara fiilo gubatay taasoo sababta in korantada ay baxdo.

Waxaan kugu dhiiri gelineynaa in aad dhaqaleysid danabka waqtiyada kuleylaha si aad u yareysid culeyska saaran siistemkena, una dhaqaleysatid lacagta biilasha. Halkaan waxaa ku yaal fikrado lagu dhaqaleysto quwadda:

- Soo koob isticmaalka qalabka soo saara kuleylka, sida qalabka lagu karsado cuntada iyo qalajiyaha dharka, khaas ahaan waqtiyada duhurnimada.
- Habeey raashinka aan u baahneyn in la kariyo, sida salaatada iyo rootiga, ama kari goor dambe habeenimada.
- Isticmaal marwaxadda la geliyo saqaafka, taasoo badanaa isticmaasha in ka yar boqolkiiba 98 korantada ku baxda qaboojiyaha hawada dhexe (central air condition).
- Xer dariishadaha maalinimada, kuna dabool daahyo iyo maryo.
- Xijaab gurigaada si uu u ahaado qabow waqtiyada kuleylaha, iyo si uu u kululaado qaboobaha.

Akhriso siyaabaha kale ee lagu dhaqaleeyo quwadda iyo lacagta marka aad soo booqatid boggena internetka: www.seattle.gov/light/.

Abaal marinta dib u cusboneysiinta

Dhowr sanno ka hor, laga bilaabo marka aan bilownay barnaamijkena qaboojiyaha/talaajada, waxaa dib loo cusboneysiiyay in ka badan 9,500 qalab duug ah oo khasaaro u keenay danabka, waxaana laga saaray korantada soo gasha xaafadda aan u adeegno. Si aad u ballansatid in lagaa soo qaado, hubso in aad aragtid warqadda xayaysiinta ee ku saabsan dib u cusboneysiinta qaboojiyaha lagana helo biilasha korantada bilaha Luulyo-Agoosto.

Lacagaha La Soo Celiyo iyo Dhimista

City Light waxay soo celisaa lacag u dhexeyso $50 ilaa $1,200 xagga qalabka isticmaala quwadda yar. Sidoo kale, danabka wuxuu isla markiiba bixiyaa dhimis marka la isticmaalo nalalka kuuskuusan ee sida wanaagsan u shaqeeya iyo tubada qabeyska ee laga helo dukaamada tafaraaruqa. Liiska badeecadaha la ogol yahay, dukaamada tafaraaruqa, iyo lacagaha la soo celiyo, waxaad ka arki kartaa www.seattle.gov/light/conserve, ama wac La Taliyaha Quwadda City Light (City Light Energy Advisor) telefoonka 206.684.3800.

Bambada Kululeynta ee aan tubada lahayn
Kululeynta waxay noqon kartaa kharashka ugu badan ee ku baxa korantada gurigaada. In aad kuleyliyaha korantada darbiga ama looxa hoose ku baddashid bambka kululeynta aan tubada lahayn waxay hoos u dhigi kartaa kharashka ku baxa kululeynta ilaa boqolkiiba 25 ilaa 50, waxayna bixin kartaa qaboojinta kuleylaha. Macaamiisha la kulanta sharuudaha xaq u yeelashada waxay heli karaan $1,200 lacagta la soo celiyo. Waxaad in badan ka baran kartaa www.seattle.gov/ductless ama wac telefoonka 206.684.3800.

Quwadda Qoraxda
Ku dhawaad 500 macaamiisha City Light waxay gashteen siistemyada quwadda qoraxda. Saxuunta qoraxda waxay soo saaraan quwad nadiif ah, oo la cusboneysiin karo, waxay hoos u dhigi karaan biilasha korantada, waxayna bixiyaan dhiirigelin xagga canshuurta. Tafasiisha ku saabsan qoraxda, waxaad ka heli kartaa www.seattle.gov/light/solar.

Warbixinta danabka 2011
Hawlaha uu qabtay danabka iyo waxyaabaha soo food saaray sannadkii 2011 waxaad ka akhrisan kartaa warbixinta sannadka City Light ee dhawanahaan la soo daabacay, iminkana laga heli karo internetka: http://www.seattle.gov/light/.

Shaqada City Light
Shaqaalaha waxay ku sugan yahiin xaafadahaan, waxayna ka shaqeyaan in nalalkaada shidan yahiin.
- Windermere: waxay silikon geliyaan fiilooyinka dhulka hoose si loo dheereeyo cimrigooda;
- SODO: waxay meel kale geliyaan khadadka quwadda si loo kordhiyo awoodda, loona siiyo quwad mashiinada qoda dhulka hoose;
- Harrison St./Aurora Ave. (bariga Seattle Center): meeleynta qolal si khadadka loo geliyo meelo kale;
- Mercer St.: guurinta khadka dhulka hoose, waxay qeyb ka tahay dayactirka Mercer;
- Laurelhurst (waqooyiga Webster Point): baddalaadda fiilooyinka dhulka hoose si loo kordhiyo awoodda;
- Occidental Ave. S.: guurinta khadadka ka hor inta aan la baddalin buundada;
- Arboretum, Galbeedka/Koofurta Seattle (koofurta Brandon St.): waxaa loo baddalaa nalalaka wadooyinka ku shaqeeyo LED;
- First Hill: waxaa lagu suraa tiirar, fiilooyin waaweyn si loo kordhiyo awoodda;
- Koofurta Beacon Hill: baddalaadda tiirarka looxa, ku darridda khadadka qeybiya si loo kordhiyo isku haleynta iyo awoodda.

Booqo www.seattle.gov/light/construction kaddibna riix calaamadda dhismaha si aad u heshid tafasiil.

Ku wareeg Buuraha American Alps
Kuleylahaan, waxaad booqataa North Cascades si aad ugu socotid, wareegtid, sahmisid. Booqo www.skagittours.com kaddibna qabso waxa aad uga baahan tahay.

Internekta ka bixi biilasha

Waxaad biilashaada danabka ka bixisaa internetka adiga oo isticmaala kaarka deynta/lacagta kugu jirta xisaabta, ama ku bixi jeeg. Si aad in badan uga baratid "biilasha lagu bixiyo internetka" ee loo yaqaan "e-billing," booqo www.seattle.gov/light/ kaddibna riix "Pay Your Bill Online" ("Internetka Ka Bixi Biilka").

Xatooyada korantada

Faragelinta mitirada si loo xado korantada waxay halis u tahay bulshada, waxayna kharash ugu fadhisaa qof kasta. Fiirso fiidiyowgaan gaaban ee laga helo internetka si aad kaalmo uga geysatid ka hortagga xatooyada quwadda: http://bit.ly/JaJZRr.

Ka Qeybgal

Ku biir Walk Bike Ride Challenge (Taxadiga Socodka Baskiilka) kuleylahaan kuna guuleyso baskiil ay bixiso Electric Bike Northwest, ku dagtid hoteelka Pan Pacific Hotel, ama bilado kale. Isticmaal jadwalka safarka internetka, kaddibna ka qaado talooyin adiga kugu kaalmeeyo baskiilka, socodka iyo baska inta badan la raaco Luulyo iyo Agoosto: www.seattle.gov/waytogo/.

Soo sheeg isticmaalka quwadda

Magaalada Seattle waxay dalbatay in inta badan milkiileyaasha ama maamuleyaasha dhismooyinka ganacsiga iyo kuwa ay dagaan qoysaska badan la socdaan isticmaalka quwadda dhismooyinkooda, kaddibna sannad kasta soo sheegaan isticmaalka quwadda. Waxaad in badan oo ku saabsan waqtiyada loo baahan yahay in la soo gudbiyo, kuwa sharciga quseeyo, sida loogu hoggaansamo, tababarada lacag la'aanta ah, iyo in kale oo badan ka ogaan kartaa www.seattle.gov/EnergyBenchmarking ama wac 206.727.8484.

Macluumaadka xariirka

Seattle City Light
PO Box 34023
Seattle, WA 98124-4023
www.seattle.gov/light

Su'aalo, faalo ama talooyin? Wac 206.684.3000 ama email u dir *Tell Seattle City Light* (internetka www.seattle.gov/light).
Tafatiraha: Connie McDougall, connie.mcdougall@seattle.gov